



Waalidiintu waxay leeyihiin: Dugsiyadu waa nabad, u jihaysan dhinaca guusha

Maajo 21, 2015

Daryeelayaasha iyo Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay aaminsan yihiin in dugsiyada caruurtoodu wax ka bartaa yihiin nabadgelyo, sidoo kale leh jawi soo dhaweyya oo kor loogu qaadayo guusha waxbarashada dhammaan ardeyda marka aad fiiriso natiijooyinkii Sahanka Guusha Dugsiyada ee 2015.

In ka badan 6,000 oo ah waalidiinta iyo daryeelayaasha dugsiyada degmada ayaa ka qeybqaatay sahanka bishii Febraayo, iyadoo la wadaagayey aragtidda caruurtooda dugsiyada. Sahankani waa kii koowaad oo noqon doonaa sahan sanadle ah dugsiyada lagu eegayo qeybihiisa kale duwan.

“Waxaan jecelahay inaan u mahadceliyo qoysaska Dugsiyada Dadweynaha (PPS) ka qeybqaadashadii heerka sare ahayd ee Sahanka Guusha Dugsiyada, “waxaa tidhi Guddoomiyaha Waxbarashada Carole Smith. “Waan nasiib badan nahay in aan leenahay bulsho, waalidiin iyo daryeelayaah ay ka go’an tahay guusha ardeydooda.”

Sahanka waxaa lagu qaatay online iyo isagoo waraaco nuqul ah lagana wada helayey dugsiyada kuna qoran lix luqadood, sidoo kale waxaa sahanka martigaliyey Oregon’s Kitchen Table, barnaamijka Kulliyada Magaalooyinka iyo Arrimaha Dadweynaha ee Jaamacada Gobolka ee Portland (Portland State University -PSU).

DHM Research (Cilmi Baadhista DHM) ayaa falanqeysay natiijada ka soo baxday iyadoo uu iftimiyey waxyaabahan soo socda ee ay ogaadeen:

- “Dugsiyadu waa meel nabad u ah ilmaheyga.” 91% jawaabihii sahanka laga bixiyey ayaa isku raacay ama si aad ah iskugu waafaqay.
- “Dugsiyadu wuxuu leeyahay qof aan la xidhiidhi karo haddii aan su’aalo hayo ama aan dareen qabo.” 90% ayaa isku raacay ama aad iskugu waafaqay.
- “Dugsiyadu si wacan buu ii soo wargeliyaa arrimaha ku saabsan hawlaha dugsiyada.” 88% ayaa isku raacay ama aad iskugu waafaqay.

Waalidiinta iyo daryeelayaashu sidoo kale dugsiyada waxay siiyeen derejo aad u sarreysa hadaladani soo socda:

- “Dugsiyadu waa meel ardeyda lagu martiqaadayo si ay wax ugu barato.” (88%)
- “Dugsiyadu wuxuu kor u qaadaa dhammaan guusha waxbarashada ardeyda.” (88%)
- “Dugsiyadu wuxuu leeyahay xafiiska soo dhaweynta.” (86%)
- “Macalimiinta ilmaheygu waxay baahiyaha waxbarashada ilmaheyga u caawiyaan si wax ku ool ah.” (86%)
- “Dugsiyadu wuxuu la wadaagaa muhiimada ay leedahay in la ixtiraamo dhammaan dhaqanada la aaminsan yahay iyo caadooyinka.” (85%)

Maamulka Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS), macalimiinta iyo shaqaalaha gargaara waxay waalidiinta siinayaan hawsha ay

qabanayaa derejo sare. Qiyaas ahaan boqolkiiba 80 waalidiintu waxa ay yidhaahdeen shaqaaluhu waxay waalidiinta iyo ardeyda ula dhaqmaan si xushmad leh. Iyadoo dugsiyada la siiyey qiimeyn derejo wanaagsan sida ay ula xidhiidhaan qoysaska:

- “Dugsiyadu si wanaagsan buu ii soo wargeliyaa arrimaha ku saabsan horumarka ilmaheygu sameynayo.” (83%)
- “Macalimiinta iyo maamulayaasha ilmaheygu waxay I tusaan siyaabo gaar ah oo aan xubin firfircoon ka noqon karo waxbarista ilmaheyga.” (76%)

Waalidiinta iyo daryeelayaasha Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxay muujiyeen dareenkooda ugu weyn ee ku aadan handadaada iyo cago-jugleynta, waqtiga qadada loogu talagalay ee ardeyda, nafaqada, iyada oo aanu jirin jimicsi, iyo wacyi-gelin la’aanta dhinaca ka qeybqaadashada sinaanshaha jinsiga ee shaqada dugsiyada degmada.

Cilmi baadhista (DHM Research) waxay ogaatay inuu joogo heerkii ugu hooseeyey aragtiyaha soo socda:

- “Dugsiyadu ardeyda wuxuu siiyaa cunto nafaqo leh ee la kala dooran karo.” 58% kaliya ayaa sahankan kaga jawaab celiyey inay ku raacsan yihiin.
- “Dugsiyadu wuxuu ilmaheyga siiyaan waqti ku filan oo ku cuno qadada.” 52% kaliya ayaa ku raacay.
- “Dugsiyadu wuxuu I wargeliyey arrimaha ku saabsan sinnaanshaha iyo jinsiga shaqada ee dugsiyada degmada.”50% kaliya ayaa ku raacay.
- “Dugsiyadu wuxuu I siiyey fursad aan kaga qeybqaato sinnaanshaha shaqada/jinsiga.” 42% kaliya ayaa ku raacay.
- “Ilmahaagu miyuu ka helaa hawlo jimicsi oo ku filan dugsiyada?” 52% kaliya ayaa yidhi intii badneyd ama waqti kasta.

Waxyaabaha kale ee la ogaaday:

- Waalidiinta intoodii badneyd ee ka qeybqaatay sahankan (71%) waxay yidhaahdeen inay ay si ballaadhan istireex ugu yihiin xadiga qiyaasaadka imtixaamida ilmahooda dugsiyada.
- Waalidiinta iyo daryeelayaasha intooda badani (57%) waxay iftiimeeyeen hanjabaada ama cago-jugleyntu inay si uun ama dareen kooban ee ilmahooda dugsiyada.
- Taariikhiyan waalidiinta iyo daryeelayaasha asal ahaan aan heli jirin addeegyadii loogu talagalay waxay u badnaayeen (40%) marka la tixgeliyo handadaada ama cago-jugleynta “si ahaan ama marka arrimaha waaweyn la barbardhigo Taariikhiyan dadkii addeega loogu talagalay heli jiray ee dhigooda ahaa (23%).

Fiirso natiijada Sahanka Guusha Dugsiyada(Successful Schools Survey results) ee www.pps.net. Natiijada dugsi kasta waxaan rajeynaynaa inay soo baxdo bisha Ogosto, shaqaalaha iyo ardeydu natiijadoodu way soo bixi doontaa.